

WAAXDA XAAFADAHA SEATTLE

YOUR VOICE, YOUR CHOICE

Your Voice, Your Choice waa geedi socodka ka qaybqaadashada miisaaniyadda, Kaas oo dadka deegaanka Seattle ay go'aamiyaan sida loo isticmaalayo qayb ka mid ah miisaaniyadda Magaalada.

Your Voice, Your Choice waxay haatan diiradda saarayaan Beeraha nasashada & Waddooyinka. Tani waa fursad ay xubnaha bulshadu si toos ah ugu go'aamiyaan sida loo isticmaali doono \$3 milyan oo miisaaniyadda Magaalada ee mashaariicda horumarinta xadadka yar-yar ee beeraha & waddooyinka Seattle (tusaale ahaan halka dadku ka maro wadada, nalalka wado goynta, dayactirka marinada wadada, kuraasta beeraha nasashada, hagaajinta wadada lugaynta, iwm).



Horumarinta baaxadda yar waxaa ka mid noqon kara:

- Mashruuc kasta oo gaaraya ilaa \$90,000
- Tusaalooyinka mashaariicda waddooyinka waxaa ka mid noqon kara marinada waddooyinka oo qiimahoodu hooseeyo, nalalka waddo goynta, nalalka waddada, meelaha dadku ka maro waddada, sara u qaadida isgoysyada, wareegyada gaadiidka, jasiiradaha bartamaha, dayactirka marinada oo qiimo jaban, iwm.
- Tusaalooyinka mashaariicda beeraha nasashada waxaa ka mid noqon kara hagaajinta helitaanka soo gelida, dayactirka iyo casriyaynta wadada lugaynta/Jiida, kuraasta iyo miisaska beerta nasashada, ama dayactirka degaanka dabiiciga ah, hagaajinta yar ee garoonka kubbada, iwm.

WAA MAXAY KAQAYBQAADASHADA MIISAANIYADDA?

Kaqaybqaadashada Miisaaniyadda waa geedi socod dimoqraadi ah oo markii ugu horayntii laga sameeyay Brazil 1989. Waxaa hadda looga dhaqmaa in ka badan 3,000 oo magaalooyinka adduunka oo ay ka mid yihiin Chicago, Boston, New York, iyo San Francisco. Kaqaybqaadashada miisaaniyadda waxa ay diiradda saartaa ku soo daridda dadka aan taariikh ahaan ku lugta lahaan jirin geedi socodka howlaha dowladda ama miisaaniyadda iyo u ogolaaneysaa xubnaha bulshada inay si toos ah u go'aansadaan sida loo qaybinayo qaar ka mid ah miisaaniyadda bulshada.



Seattle
Neighborhoods

**Strengthening Seattle by
Actively Engaging All Communities**

WAAXDA XAAFADAHA SEATTLE

YOUR VOICE, YOUR CHOICE

SIDA LOOGA QAYBQAATO

Waxaa jira dhowr siyaabood oo xubnaha bulshadu ay uga qaybqaataan geeddi-socodka howsha Your Voice, Your Choice. Waxaan isku daynay inuu u sameeyno sida ugu fudud ee suurtagalka ah ee dadka deggan Seattle ay uga soo qeybgeli karaan. Eeg qaababkeena kala duwan ee ku lug lahaanshada:



Ururinta Fikradda

Xubnaha bulshada ayaa isku weydaarsada fikradahooda oo soo gudbiya fikradaha mashruuca la maalgelinayo. Qof kasta waa lagu soo dhaweynayaa inuu u soo gudbiyo fikradaha mashruuca. Fikradaha waxaa lagu soo gudbin karaa online-ka ama dhacdooyinka kala duwan ee lagu wacyigelinayo shacabka.

Horumarinta Mashruuca

Kooxaha horumarinta mashruuca ayaa laga samayn mid kasta oo ka mid ah golaha toddobada degmo oo waxay masuul ka ahaan doonaan inay u bedelaan fikradaha la soo jeediyay mashruuca la taaban karo. Qof kasta waa lagu soo dhaweynayaa inuu ka mid noqdo kooxda horumarinta mashruuca degmada.

Your Choice: Codeynta

Xubnaha bulshada ayaa u codeyn doona mashaariicda ugu sarreeysa golahooda degmada shaqsi ahaaneed gudahiisa. Qof kasta ayaa ka codeyn kara mashaariicda degmadiisa!

Maalgalinta & Dhaqangelinta

Golaha degmo kasta waxay soo xuli doonaan mashaariicda ugu sarreeysa ee ay u codeeyaan ee gaaraya heerka qiimaha ah \$285,000. Waaxaha Magaalada ayaa dhaqangelin doonta mashaariicda ku guulaystay sanadka soo socda.

MACLUUMAADKA XIRIIRKA

YOUR VOICE, YOUR CHOICE

WAAXDA XAAFADAHA SEATTLE

600 4th Avenue, 4th Floor

P.O. Box 94649; Seattle, WA 98124

seattle.gov/your-voice-your-choice

Kraig Cook

Telefoonka: 206.233.2044

Imayl: Amy.Nguyen@seattle.gov